

Xeer lamba. 18 ee 13 Oktober 1965 rep.

Ku darridda Qeybta Ilaalada Canshuurta iyo Maaliyada ee Ciidanka Booliska

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay qod. 63 ee Dastuurka

Kadib markii la garawsaday baahidda loo qabo in la isku daro Qeybta Ilaaladda Canshuurta iyo Maaliyadda iyo Ciidanka Booliska.

Kadib markii la tixgeliyey soo jeedinta Ra'iisul Wasiirka oo la xiriiro Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Wasiirka Maaliyadda

Kadib markii la dhegeysta soo jeedinta Golaha Wasiiradaha

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

1. Qeybta Ilaaladda Canshuurta iyo Maaliyadda waxaa lagu daro Ciidanka Booliska;
2. Shaqaalaha ka tirsan Qeybta Ilaalada Canshuurta iyo Maaliyada waxay Dekreetadani ka dhigi doontaa kuwa hoos tago Ciidanka Booliska, iyadoo darajada iyo howshooda adeeg iyo heerka dhaqaale oo horay u haysteen ku soo wareegi doono.

Qod. 2

Wasaaradaha Maaliyada iyo midda Ganacsiga iyo Warshadaha waxay si toos ah ula xiriiri doonada Ciidanka Booliska si ay ugu gudbiyaan amarrada la xiriira howlahooda.

Qod. 3

Madaxa ka bilowd labarka laad ilaa 16 - ee Cutubka 2aad – Wasiirka Maaliyada – Qeybta Ilaalada Canshurta iyo Maaliyadda waxaa loo beddeley, sida ku cad Cutubka 5 - Wasiirka Arriaha Gudaha, midda Misaaniyadda hordhaca ah ee sanadka 1965.

Qod. 4

Sharci kasta ee hor imaanaya ama khilaafaya Dekreetada waa la buriyey

Qod. 5

1. Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco, waxaana la horgeyn doona Golaha Qaranka si sharci loogu beddelo sharci sida ku qoran qod. 63 ee Dasturka
2. Waxaa la farayaa cid kasto in ay u hoggansato sharcigaan una hoggamiso qof kasto.

Muqdisho, 13 Oktober 1965.

Aadan Cabdulle Cusmaan

Rai'sul Wasaaraha

Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Caddaladda iyo Arrimaha Diinta

Abdirahman Haji Mumin

Wasiirka Arrimaha Gudaha
Abdulqadir Mohamed Aden

Wasiirka Maaliyadda
Abdulqadir Mohamed Aden